

Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol:

Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska

Su'aalaha laga yaabo inaad qabto

Qaybaha:

- A. Ku Saabsan Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol (BDPA)
- B. Isticmaalista BDPA-gaaga
- C. Taageero, kaalmo, hagitaan iyo cillad-bixin
- D. Macluumaad iyo xiriiro dheeraad ah

[A] Ku Saabsan Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol (BDPA)

1. Waa maxay Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol (BDPA)?

Haddii lagu qiimeeyay oo aad qabto baahiyo daryeel iyo taageero oo u qalma kaalmo laguuna qoondeeyay miisaaniyad shaqsiyeed, waxaad dooran kartaa inaad lahaato "Lacagaha Toos ah" oo kuu sahli doonta inaad qorsheysato oo iska bixiso kharashaadka daryeelkaaga. Golaha ayaa ku siin doonaa akoon aad ku maareysanayso lacagta aanu kuu soo dirno.

Lacagta aad xaq u leedahay inaad hesho waxa goluhu ku soo wareejin doonaa akoonka. Waxa dhici kara in kharashka daryeelkaaga aad wax ka bixiso, lacagtaas qudheedana waxa lagu soo shubi doonaa akoonka. Akoonka waxa sidoo kale la socda kaar, kaas oo la mid ah kaarka lacagaha lagu shubto, oo aad u adeegsan karto inaad lacagaha iskaga bixiso. Keliya waxaad akoonkaaga u adeegsan kartaa bixinta lacagaha ama wax ku iibsano kartaa inta lacag ku filani kuugu jirto. Tan waxa u sabab ah awood uma lihid inaad akoonkaaga caseyso (isticmaasho wax ka badna intii kuugu jirtay). Waxyabahaas waxa ka mid ah lacag bixinaha dhigaalka tooska ah, dalabka taagan ama isticmaalka biinka iyo jibka kaarka.


2. Sidee buu u shaqeeyaa Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol??

Haddii aad damacdo inaad gadato adeeg ama alaabo lagu muujiyay qorshahaaga taageero, akoonkaaga ayaad u adeegsan doontaa inaad ku gadato. Kaarka la socda akoonka waxa loo adeegsan karaa in wax lagaga gato khadka, ama iyadoo la isticmaalayo taleefan, ama si toos ahba. Akoonka waxaad u adeegsan kartaa inaad iskaga bixiso lacagaha halka mar ah ama kuwa joogtada ah, dalabyada taagan iyo kuwa dhigaalka tooska ah. Waxaad wax gadan kartaa inta akoonka lacag ku filan kuugu jirto mana awoodi doontid inaad isticmaasho wax ka badan xaddiga akoonka kuugu jira.

3. Ma leeyahay Xad Daymeed?

Maya, maaha kaar daymeed markaas ma laha wax xad daymeed ah. Waxaad isticmaali kartaa keliya lacagta akoonkaaga kuu jirta, markaas wax ka badan intaas ma isticmaali kartid.

4. Sidee buu kaarku u eeg yahay?



5. Goorma ayaan helayaa kaarkayga?

Marka qorshahaaga taageero la aqbal, nidaamka diyaarinta akoonkaaga iyo soo dirista kaarkaagu waxay qaadan kartaa illaa laba todobaad. Waanu ku soo ogeysiin doonaa xilliga aad fileyso in lacagta ugu horeysa lagu soo wareejiyo akoonkaaga.

6. Sidee ayaan u helayaa kaarkayga?

Prepaid Financial Services (PFS) ayaa kaarkaaga boostada soo dhigaya kuna soo diraya cinwaanka gurigaaga, ama cinwaan kale haddii adiga/cidda hawshaada waday lagula heshiiyo. Tusaale ahaan, tani (cinwaan kale in lagu diro kaarka) waxay dhacaysaa haddii qofku cid kale u xilsaaray inay ka kaalmeeyso maareynta Lacagtooda Kaalmada Tooska ah.

7. Waa maxay faa'iidooyinka Isticmaalka Kaarka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol?

Ma isticmaali kartid wax ka badan lacagta akoonka kuugu jirta. Tani waxay taageero wax ku ool ah ka geysataa dhanka kharash qorsheysiga waxayna kaa caawineysaa ka hortaga inaad kaarka caseyso (deyn gasho). Sidoo kale kaararka:

- Meelo badan ayaa laga aqbalaa in lacag la iskaga bixiyo
- Way fiican yihiin maadaama aanay ku xirney akoonkaaga shaqsigaa ah ee bangiga oo Lambar sir ahna lagu ilaaliyay.
- Way ka aaminsan yihiin sidashada lacag caddaan ah
- Waxay marxiyaan waqtiga iyo lacagta
- Waxay adiga iyo golahaba siiyaan warbixin ku saabsan waxyaabaha lacagtii kaarka loo adeegsaday - way fududahay in la arko haddii dhibi jirto
- Waxay sahlaan helista iyo isticmaalka lacagaha
- Si fudud baa haraaga lacagaha loola socon karaa looguna maareyn karaa
- Way habboon yihiin
- Waxay kaalmeeyaan ka qaybgelinta maaliyadeed.

8. Kaarkaygu marna ma dhacayaa?

Haa. Taariikhda dhacistaanka waxaad ka eegi kartaa wajahada hore ee kaarka. Haddii kaarkaagu dhowaan dhacayo, oo aadan helin kaarkaaga cusub, fadlan Care Direct kala xiriir 0117 9222700.

[B] Isticmaalka Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol (BDPA)

9. Waan helay kaarkayga, hadda maxaan sameeyaa?

Markaad kaarkaaga ka hesho Prepaid Financial Services (PFS) warqadda la socota ayaa kuu sharraxi doonta sida aad uga shaqeysiinayso. Waa inaad buuxisaa tallaabooyinka soo socda ka hor intaadan bilaabin isticmaalka kaarka:

- a) Saxiix diilinta saxiixyada ee ku taal gadaasha kaaraka
- b) Kaarka BDPA kaga shaqeysii taleefan ahaan, adigoo u maraya nidaam otomaatig ah loo

yaqaan Jawaabta Codka Falgalka leh (Interactive Voice Response (IVR), lagu sharraxay S9, ee hoose).

Ama

Ka Shaqeysii kaarka BDPA adigoo isticmaalaya adeega fariimaha qoraalka (SMS). BIIN-kaaga ku hel taleefan ahaan adigoo u maraya IVR ama farriin qoraal ah (SMS)

Wixii tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan sidaad kaarka uga shaqeysiin lahayd adigoo adeegsanaya taleefan ama farriin qoraal ah, fadlan la xiriir warqadda kaarkaaga la socda, ama fiiri macluumaadka hoose.

Si aad uga shaqeysiiso taleefan ahaan, fadlan wac Jawaabta Codka Falgalka leh (Interactive Voice Response (IVR)): 020 3327 1991 020 3468 4112 020 7183 2248

Si aad farriin qoraal ah (SMS) ugaga shaqeysiiso fadlan isticmaal lambarka soo socda 0447860 048872: Kelmada "PIN" oo uu ku xigo isbees iyo 8-da lambar ee u dambeeya kaarkaaga tus. 'PIN 12345678' qoraal ahaan ugu dir.

10. Waa maxay IVR?

Interactive Voice Response (IVR) waa nidaam wacaha la falgalaya isagoo adeegsanaya cod iyo xogta laga soo gelinayo kii baadhka. Waxay taasi la macno tahay inaad kii baadhka taleefankaaga, ama amaro cod ah oo sahlan u adeegsan karto kala doorashada ikhtiyaarada.

Shaqooyinka aad qabsan karto markaad isticmaalayso IVR waa: Ka shaqeysiinta kaarka; la soo bixidda BIINKA (Lambarka sirta ah), iyo BIIN xasuusiyayaasha. Waxaad sidoo kale ku eegi kartaa haraagaaga, iyo inaad ku soo sheegto haddii kaarka lagaa xado ama uu kaa lumo.

11. Intee jeer ayaa Lacagtayda Tooska ah la iigu shubayaa akoonkayga?

Lacagtaada dakhliga shaqsiyeed waxa akoonkaaga laguugu shubi doonaa labadii todobaadba mar. Waxa laga yaabaa in Goluhu muddada ka dhigo 4 todobaad.

12. Lacagtayda khaaska ah ma ku shuban karaa akoonka?

Haa. Waxaad akoonkaaga lacag ugu shubi kartaa qaababka soo socda: diyaarinta Dalab Lacagbixineed taagan (Standing Order) oo lacagta akoonkaaga bangiga looga soo wareejinayo laguna shubayo akoonkan; ama dhanka khadka oo ah halkan www.prepaidfinancialservices.com/en, ama taleefan ahaan iyadoo la wacayo khadka caawimada ee Adeega Macaamiisha 0203 633 1321.

Marka wareejintaas la sameynayo, mid ka mid ah lambarada tixraacyada ee soo socda waa in la soo sheegaa:

xxxxxxxCC - Lacagaha Macmiilku Baxsho (Lacagaha Aad Ku Darsanayso Akoonka)

xxxxxxxTP - Lacag ku shubis

Dhammaan lambarada tixraaca ee kore waxay u bilaabmayaan lambar 8 - waana lambarka xisaabtaada. Labada xaraf ee xiga waxay sheegayaan nooca lacagbixinta. Tusaale ahaan, haddii aad rabto inaad akoonka ku soo shubto Lacagta Adigu Bixinayso oo lambarka xisaabtaadu yahay 12345678, lambarka tixraacu wuxu noqonayaa: 12345678CC

Lacagaha waa in lagu soo wareejiyo xisaabtaada BDPA ee kaaga furan PFS.

Sorti koorka (Sort Code) akoonkaagu waa: **23-75-24**

Lambarka xisaabtaadu waa: **8-da lambar ee u dambeeya aqoonsiga kaarka lagu siiyay (wuxu ku yaal wajahada hore ee kaarka)**

13. Xisaabtayda si joogto cid kale lacag ma uga diri karaa?

Haa, waxa jira 2 qaab oo adiga ama qof aad idan siisay u diyaarin karo in lacagbixin joogto ah akoonkaaga looga sameeyo.

Waxaad tan ka dhex sameyn kartaa bogga dadka kaarka haysta. Waxaad u baahan doontaa:

- Inaad tafaasiisha xisaatba cidda aad lacagta u direyso geliso bogga Codsiga

Lacagbixinta

- Inaad geliso xaddiga lacaga la bixinayo iyo taariikhda la bixinayo (FG- Nidaamku wuu xasuusan doonaa tafaasiishan aad gelisay, oo marka xigta ee aad lacag u shubayso qofkan ama hay'addan, waxaad ka soo dooran kartaa liiska hoos u baxaya)
- Waxaad sidoo kale Daryeelka Macaamiisha PFS ka wici kartaa lambarka **020 3633 1321** si aad cidda lacagta la siinayo uga gudbiso dhanka taleefanka.
- Fadlan xasuusnoow inay qaadaneysa ugu yaraan 3 maalin shaqo si lacagtu u baxdo. Markaas haddii dooneyso inaad hay'ad lacag u dirto taariikh cayiman, hubi inaad lacag wareejinta sameyso 3 maalmo shaqeed ka hor taariikhdaas.

[C] Taageero, kaalmo, hagitaan iyo cillad-bixin

14. Ma beddeli karaa Lambarka sirta ah (BIINKA) la ii sameeyay?

Haa, awood ayaad u leedahay inaad BIINKAAGA ka beddesho mishiin lacageed (ATM) kasta. Si kastaba ha ahaatee, lambarada sirta ah (BIINANKA) waxa markasta lagala soo bixi karaa nidaamka IVR (Eeg S8).

15. Waxaan illaaway lambarkaygii sirta ahaa, maxaan sameeyaa?

Haddii aad ilowday ama aad wayday lambarkaagii sirta ah oo aad u baahan tahay inaad dib u hesho, fadlan IVR (Iagu sharraxay S8) ka wac mid ka mid ah taleefanada soo socda:

020 3327 1991

020 3468 4112

020 7183 2248

16. Sidee baan ku heli karaa macluumaadka xisaabtayda iyo haraaga kaarkeyga?

Waxaad macluumaadka akoonka iyo haraagiisaba ku heli kartaa adigoo isticmaalaya lambarka iyo BIINKA kaarkaaga si aad ugu gasho bogga dadka kaarka haysta ee kuu gaarka ah www.prepaidfinancialservices.com/en Waxaad ka heli doontaa shaashadda 'Eeg Tafaasiisha Akoonkaaga'. Dhammaan macluumaadka kharashaadka aad gashay ayaa sidoo kale kuugu diyaar ah si aad u daabacato markasta oo aad damacdo.

Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa IVR ama adeega fariimaha qoraalka ah (SMS) si aad u eegto haraagaaga. Si aad haraagaaga uga dhex eegto IVR, fadlan wac:

020 3327 1991

020 3468 4112

020 7183 2248

Si aad farriin qoraal ah (SMS) ugu eegto haraagaaga fadlan isticmaal lambarka soo socda 0447860 048872. Kelmada ""Balance"" oo uu ku xigo isbees iyo 4-ta lambar ee u dambeeya kaarkaaga tus. 'Balance 1234' qoraal ahaan ugu dir.

17. Sidee baan ku ogaada lambarka xisaabtayda iyo soorti koorkeyga (sort code)?

Lambarka xisaabtaada iyo sorti koorkeyga (sort code) waxay ku daabacnaan doonaan kaarkaaga. Waxay sidoo kale ka muuqan doonaan websaydka Kaar-haystayaasha khaasatan bogga Tafaasiisha Xisaabta.

18. Sidee baan ku helaa caawimo haddii aan su'aalo ka qabo kaarkeyga?

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan kaarkaaga, booqo websaydka Prepaid Financial Services (PFS) www.prepaidfinancialservices.com/bristolcitycouncil . Waxaad sidoo kale wici kartaa lambarka shaqaalaha adeega macaamiisha ee loo qoondeeyay dadka deggan Bristol **0203 633 1321**. Waxa lambarkan la heli karaa 8 subaxnimo - 9 fiidnimo Isniin illaa Jimce.

Waxaad lambarkan u adeegsan kartaa inaad soo weydiiso wax kasta oo la xiriira maareynta akoonkaaga lacag-dhigaalka sida sameynta lacagbixinta.

Adeega otomaatig ah (IVR) ee loogu talagalay kaararka luma ama la xado wuxu shaqeynayaa 24-ka saacadood ee maalintii, 7-da beri ee todobaadkii. Fadlan S10 kala soco lambarada xiriirka IVR.

Waxaad sidoo kale PFS kula xiriiri kartaa iimayl ahaan:
bristolcouncil@prepaidfinancialservices.com

19. Maxaan sameeyaa haddii aan lacagbixin aanan garaneyn ku arko AKoonkayga Dhigaalka Tooska ah ee Bristol?

Waa inaad sida ugu dhaqsaha Prepaid Financial Services ugala xiriirtaa khadka macaamiisha ee **0203 633 1321** si aad ugu wargeliso lacagbixinta aadan aqoonsan. Haddii ay kaa caawin kari waayaan aqoonsashada lacagbixinta waxay kaa dalban karaan inaad buuxiso foom ay kula xiriiri doontaa hay'adda lacagta kalabaxday akoonkaaga oo waxay isku dayi doonaan soo celinta lacagtaas.

20. Waxaan horey u isticmaali Lacagbixinta Tooska ah. Maxaa ku dhacaya Xisaabtayda Lacagbixinta Tooska ah ee Bangiga, iyo haraagii iigu jiray?

Golaha ayaa kuu soo diri doona tilmaamo kaa caawin doona sidaad haraaga kuugu jiray Xisaabtaadii Lacagaha Tooska ah ee hore ugu wareejiisanayso xisaabtaada cusub. Intaas ka dib xisaabtaadii hore waa la xiri karaa iyadoo bangiga la wargelinayo.

21. Maxaa dhacaya haddii aan lambarkayga sirta ah si khaldan u geliyo?

Waxaad haysataa 3 isku day oo aad lambarkaaga sirta ah ku gelinayso. Haddii aad marka saddexaad ka dib si khaldan u geliso, akoonkaaga si ku meelgaar ah ayaa loo xannibi doonaa. Haddii tani dhacdo, waxaad u baahan doontaa inaad daryeelka macaamiisha ee PFS kala xiriirto **020 3633 1321** si aad xannibaada uga qaaddo kaarkaaga.

22. Wax kharash oo isticmaalka kaarka ah miyaa la iga rabaa?

Ma jiraan wax kharash ah oo lagugu dallacayo markaad kaarka wax ku iibsato, ama aad lacag ugu dirto hay'adaha aqbala kaararka MasterCard ama markaad lacag ka bixiso Xisaabtaada Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol. Golaha Deegaanka Bristol ayaa kaarka bilaasha kugu siinaya kuuna beddelaya marka uu kaa dhaco. Tani waxya dhici doontaa **labadii** sannadoodba mar haddii aad sii wadato helista Lacagaha Kaalmada Tooska ah. Caadiyan ma jiro kharash lagaa qaadayo marka kaarku kaa lumo balse haddii uu kaarku si joogto ah kaaga lumo oo aad marar badan u baahato beddelaad lacag ayaa lagugu soo dallaci doonaa. Tafaasiisha kharashkan waxa sidoo kale laga heli karaa shuruudaha iyo sharciyada PFS ku siisay.

23. Lacaga caddaan ah ma la bixi karaa anigoo isticmaalaya kaarkeyga BDPA?

Haa, lacag caddaan waad kala bixi kartaa ATM-ka adigoo isticmaalaya kaarkaaga BDPA. Hase ahaatee baahida lacagta caddaanka ah loo adeegsaday waa inay ku faahfaahsanaataa qorshaha taageerada oo waa in rasiidhada lacag kasta oo naqad ahna la hayo, kuwaas oo Golaha Deegaanka Bristol kaa soo dalban karo.

Xadka lacagta ugu badan ee dhammaan kaararka lagala bixi karo maalintii waa £50, iyadoo lagu sheego inaan akoonkaaga loo ogolayn in lagal baxo acag caddaan ah maahane.

24. Maxaa dhacaya haddii lacagta aan wax ku gatay ka badato haraagayga?

Haddii taasi dhacdo, iibkaagaas waa la diidi doonaa. Waxaad sugi doontaa inta akoonkaaga lacag ku filan ku soo dhacayso si aad iibka u sameyso. Haddii lacagbixin lagaa diido, fadlan Care Direct kala xiriir taleefanka 0117 9222700.

25. Maxaan sameeyaa haddii kaarkeyga BDPA iga lumo ama la iga xado?

Haddii kaarku kaa lumo ama lagaa xado ama aad aaminsan tahay inaanu aamin ahayn waa inaad isla markiiba wargelisaa qolyaha daryeelka macaamiisha ee PFS adigoo ka wacaya **0203 633 1321**. Taas beddelkeed waxaad adeega otomaatiga ah ee 24-ka saacadoodba ah (IVR) kala xiriiri kartaa:

020 3327 1991

020 3468 4112

020 7183 2248

26. Muddo intee in le'eg ayay qaadaneyso in kaarka la ii beddelo?

Waxay qaadan kartaa illaa 10 maalmo shaqeed.

27. Maxaa dhacaya haddii aan beddelo cinwaankayga?

Waa inaad soo wargelisaa Shaqaalaha Care Direct ee Golaha Deegaanka Bristol: 0117 92 22700. Waxa laga yaabaa inaad isu qabto wixii khasaare ah ee akoonkaaga soo gaara ee ka dhasha in aadan soo sheegin isbeddelka ku yimi cinwaankaaga.

28. Maxaa dhacaya haddii aan muddo ka dib iska naco isticmaalka Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol?

Haddii aadan rabin inaad isticmaasho Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol fadlan Care Direct kala xiriir taleefanka 0117 9222700 iyaga ayaana kaala talin doona tallaabooyinka xiga. Care Direct ayaa kaala hadli doonta inay jirto qaab kale oo aad Lacagbixinta Tooska ah ku heli karto inay jirto iyo in kale. Care Direct waxay sidoo kale kuu sharraxi kartaa tallaabooyinka aad u baahan tahay inaad qaaddo haddii aadan u baahneyn inaad sii wadato helista Lacagaha Tooska ah.

29. Goluhu ma arki karaa kharashaadka aan ku galo akoonkayga?

Haa. Waanu eegi karnaa oo daabacan kartaa warbxinaha lacagaha laga isticmaalay akoon kasta iyo haraaga ku jiraba. Waxaanu macluumaadkan u adeegsanaa inaanu kula socono in lacagta lagu siiyay buuxisay baahiyihii daryeel ee horey loo soo qiimeeyay. Tani waxay la macno tahay inaan lagaa rabin inaad afartii biloodba mar noo soo dirto macluumaadkan isagoo waraaqo ah. Goluhu wuu ka taxadaraa oo ixitiraamayaa xuquuqdaada iyo asturnaantaada. Wixii tafaasiil dheeraada ah ee ku saabsan sida aanu u ilaalineyno xogtaada fadlan booqo www.bristol.gov.uk/dataprotection. Fadlan sidoo kale tixraac foomka Heshiiska Adeegga Isticmaalaha wixii macluumaad dheeraada ah.

30. Miyaan u baahanahay inaad haysato nuqulada rasiidhada iyo dukumeentiyada la xiriira lacagaha laga saaray Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol?

Haa. Waxaad u baahan tahay inaad haysato nuqulada rasiidhada, qaansheegaha iyo xogta mushahar ee la xiriirta lacagbixinaha laga saaray kaarkaaga lacagta laguugu shubay. Golaha waxa masuuliyadi ka saaran tahay inuu hubiyo in miisaaniyadaada shaqsiyeed loo adeegsado in lagu gaaro natiijooyinka ku xusan qorshahaaga taageerada. Waqti ka waqti waxaanu kaa soo dalban karnaa xogta waxyaabaha aad lacagta ku gadatay si aanu hanti-dhowr ugu sameyno.

Haddii rasiidh kaa lumo ama aad soo heli waydoba, qoraal yar oo ku saabsan dhacdada qor oo meel kula rid rasiidhada kale.

31. Goluhu lacag dib ma ugala bixi karaa akoonkeyga?

Haa, Goluhu lacag dib wuu ugala bixi karaa akoonkaaga. Hase ahaatee, tan waxaanu sameyn karnaa xaalado gaar ah markay yimaadaan. Tusaale, marka uu jiro walaac tacadi maaliyadeed ah, si xun u adeegsiga Lacagaha Tooska ah, lacagta arrimaah degdega ah oo xad dhaaf noqota ama sababaha kale oo lagaala hadlay oo aad aqbashay.

Inta akoonkaaga loo adeegsanayo ujeedadii loogu talagalay, Goluhu wuxu lacag kala laaban karaa akoonkaaga keliya marka lacag dheeraad ahi soo gasho. Golaha ayaa kaala hadli doona sababta lacagtu dheeraadka kuugu tahay, si loo hubiyo in aanan la bixin lacag aad uga baahan tahay daryeelkaaga.

Si fiican ayaad had iyo jeer u maareysan kartaa lacagahaaga haddii aad si adag u raacdo shuruudaha Heshiiska Adeega Isticmaalaha.

32. Maxaa dhacaya haddii aan dhinto?

Markaad dhimato waanu joojin doonaa lacagta tooska ah ee aad hesho isla maalinta dhimashadaada, xiri doonaa akoonkaaga haraaga ku jirana waxa la bixi doona Golaha. Shaqaalaha Maaliyadda ee Waaxda Lacagaha Tooska ah ee Golaha ayaa la soo xiriiri doona cidda ku metelaysa ama ciddii qoyskaaga ah ee kuugu dhow haddii ay jiraan lacago kugu taagan iyo kharashaad daryeel oo lagugu leeyahay.

Fadlan ogsoonow waxlacag bixin ah oo kale lagama saari karo akoonka , tusaale ahaan, kharashaadka aaska lagama bixin karo lacagtan miisaaniyadaada shaqsiyeed.

33. Sidee bay ii saameynaysaa haddii Lacagtayda Tooska ah ay Hay'adi maamusho?

Xirfadlaha lagu xilsaaray ayaa tan kaala hadli doona oo hubin doona inaad hesho dhammaan taageerada iyo macluumaadka aad u baahan tahay. Haddii aadan haysan xirfadle kuu xilsaaran balse aad dareemayso inaad u baahan tahay talo dheeraad ah, fadlan Care Direct kala xiriir 0117 9222700.

34. Kaarku ma yahay mid aamin ah oo si badbaadsan loo isticmaali karo?

Si la mid ah kaararka lacagta la dhigto ama kuwa deynta ee kale ee aynu isticmaalno, fadlan taxaddar oo ilaali kaarkaaga iyo lambarkiisa sirta ahba. Fadlan tixraac Shuruudaha iyo Xaaladaha kaar-haystaha, oo lagu soo raacin doono kaarkaaga BDPA. Waxaad sidoo kale Shuruudaha iyo Xaaladaha PFS ka heli kartaa onlayn barta www.prepaidfinancialservices.com/bristolcitycouncil. Taas beddelkeed, fadlan sharciyaqaankaaga ka dalbo nuqul qoran oo Shuruudaha iyo shuruudaha.

35. Maxaa ku dhacaya foomkayga Heshiiska Adeega Isticmaalaha ee horey u jiray haddii aan

u soo wareego Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol?

Haddii aad doorato inaad u soo wareegto Akoonka Lacagta Kaalmada Tooska ah ee Bristol, waxaad u baahan doontaa inaad saxiixdo foom cusub oo Heshiiska Adeega Isticmaalaha ah. Xirfadlahaaga ayaa kaa caawin doona nidaamka.

[D] Macluumaad iyo tafaasiil xiriireed dheeraad ah

Prepaid Financial Services (PFS)

Jawaabaha Falgalka Leh ee Codka (Interactive Voice Response (IVR)). Kani waa adeeg taleefan otomaatig ah. Waxaad adeegan u adeegsan kartaa inaad kaga shaqeysiiso kaarkaaga ama ku hesho lambarkaaga sirta ah ama dib ugu soo ceshato lambarkaaga sirta ah adigoo isticmaalaya taleefankaaga. Dadka degan Bristol waxay adeegan heli karaan 14-ka saacadood ee maalintii, iyo 7-da beri ee todobaadkii iyagoo isticmaalaya lambarada taleefanka ee soo socda:

- 020 3327 1991
- 020 3468 4112
- 020 7183 2248

Adeega Macmiilka ee PFS Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan kaarkaaga oo aan lagu xusin dukumeentiga, la xiriir shaqaalaha daryeelka macaamiisha ee Reer Bristol adigoo ka wacaya taleefanka **0203 633 1321**.

Farriin qoraal ah ugu dir lambarka - 0447860 048872

Xarunta wicitaanku waxay shaqeysaa Isniin illaa Jimce (marka laga reebo Fasaxyada Bangiyada) laga bilaabo 8-d subaxnimo - 9ka galabnimo.

Cinwaanka iimaylka ee PFS ee dadka deggan Bristol:

bristolcouncil@prepaidfinancialservices.com

Waxaad sidoo kale Shaqaalaha Care Direct ee Bristol iimayl ugu diri kartaa:

adult.care@bristol.gov.uk

Lambarka xiriirka Care Direct ee Golaha Deegaanka Bristol waa: 0117 92 22700. Khadadka waxay furan yihin 8.30 subaxnimo - 5ta galabnimo Isniin illaa Jimce (marka laga reebo maalmaha fasaxa bangiyada).

Mahadnaq Waxa mahad iska leh Golaha Deegaanka Nottingham (www.nottinghamcity.gov.uk) oo naga caawiyay isku keenista macluumaadkan.



Tare and
support L
&IJOJ

